



Dr. Renard Adams oo ku soo Biiraya PPS isagoo ah Madaxa Cilmibaarista, Qiimaynta, iyo Isla Xisaabtanka

Dr. Renard Adams, oo ah hoggaamiye waxbarasho oo guulo soo hooyey oo leh taariikh ah inuu isticmaalo xogta si uu hore ugu mariyo taageerada dugsiga iyo hagaajinta degmada, wuxuu ku soo biiri doonaa Dugsiyada Dadwaynaha Portland isagoo noqonaya Madaxa Cilmibaarista, Qiimaynta, & Isla Xisaabtanka, ayuu ku dhawaaqay Kormeeraha Guud, Guadalupe Guerrero toddobaadkan.

“Waxaanu ku faraxsannahay inaanu soo dhawayno hoggaamiye aad loo qaddariyo, Dr. Adams, kaasi oo sooyaalkiisa waxbarasho iyo hoggaamiyenimo ay xoojin doonto awoodda aynu u leenahay inaynu qaadano go’aano xogtu hagayso kuwaasi oo si wanaagsan wax ugu tari doona ardaydeena innagana inaga dhigi doona nidaam dugsi oo xooggan,” ayuu dhahay Kormeeraha Guud, Guerrero.

Isagoo hoos tagi doona Kormeeraha Guud shaqadan heerka gole, Dr. Adams wuxuu gali doonaa shaqadii uu hore u hayay Dr. Russell Brown. Wuxuu noqon doonaa xubin ka tirsan Kooxda Hoggaaminta Kormeeraha Guud wuxuuna hoggaamin Xafiiska Cilmibaarista, Qiimaynta, iyo Isla Xisaabtanka. Wuxuu sii wadi doonaa inuu ku xisaabtamo doorka muhiimka ah ee kooxdan ee hirgalinta qiimaynta si ay xog u helaan qaybaha kala ah waxbarista, daraasadaha joogtada ah ee cilmibaarista iyo qiimaynta, iyo diyaarinta lafagurka xogta si hore loogu sii wado hawlahaaga hagaajinta ee joogtada ah.

“Xogtu waa inay ahaato sida toosh, taasi oo iftiiminaysa horumarka iyo guulaheena iyo sidoo kale aaggeena si aynu u samayno horumar iyo korriin joogto ah,” ayuu dhahay Dr. Adams. “U wadaagista iyo uga xaajoodka xogteena nidaamka si caam ah waxay siin doontaa daahfurnaan joogto ah hawlqabadka nidaamka.”

Dr. Adams wuxuu PPS uga yimi Dugsiyada Dadwaynaha Degmada Baltimore, halkaasi oo uu ka soo qabtay shaqooyin kala duwan oo hoggaamineed ilaa 2007, oo ay ku jiraan Agaasimaha Sare ee Fulinta ee Hawlgallada Manhajka, Agaasimaha Fulinta ee Maaraynta iyo Qiimaynta Hawlqabadka.

Wuxuu ka soo qabtay door hoggaamineed soosaaridda iyo hirgalinta “Qorshaha 2.0: Jidkeena Hore u Socodka,” ee degmada oo ah mashruuc qorshe xeeladeed kaasi oo soconayay shan sano. Dr. Adams wuxuu hoggaaminayey abuurista qaabdhismeed nidaamka oo dhan ah oo ku aaddan qiimaynta barnaamijka, oo ay ku jiraan hannaan lagu xulanayo, ansixinayo laguna qaadanayo barnaamijyada iyadoo la adeegsanayo lafagur xogeed si loo nidaamiyo hannaanyada ku aaddan maamulayaasha iyo macallimiinta.

Dr. Adams sidoo kale wuxuu wax ka dhigay heer jaamaceed, wuxuuna Kaabe Kaaliye Barasare ka ahaa Jaamacadda Goucher iyo Jaamacadda John Hopkins, wuxuuna ka noqday kaaliye maamule dugsiyo hoose iyo sare.

Wuxuu ku dhashay oo ku barbaaray Baltimore, waxaana soo jiidatay farshaxanka, wuxuuna qaatay shahaadada Baajularka ee Farshaxanka, isagoo xoogga saaray sawiridda iyo tusaalaynta, isagoo ka qaatay Kuuliyadda Morehouse. Wuxuu ogaaday jihada mihnaddiisa mar uu ka shaqaynayey shaqo gaysay fasal waxbarasho.

“Waxaan waxbarashada ku soo galay anigoo si qof-calaa-qof ah ula shaqaynaya arday qabay naafooyin badan,” ayuu dhahay Dr. Adams. “Aad ayaan u jeclaa fasalka taasi oo keentay inaan dugsi u shaqo tago oo aan noqdo macallin waxbarashada gaarka ah ka dhiga dugsi dhexe. Runtii ma jirto wax la barbardhigi karto dareenka xooggan ee dhaca marka ardaydu wax baranayaan.”